



Male Circumcision

Male circumcision is the removal of the foreskin around the end of the penis. If you decide on circumcision, your baby's doctor will do it in the hospital's nursery. If your baby is small or has any medical problems, the circumcision may need to be done later. The doctor will have you sign a consent form before the procedure is done.

Uncircumcised Penis



Circumcised Penis



During the Procedure

- The doctor will put a numbing medicine gel on the penis.
- Your baby may be offered a pacifier dipped in sugar water to ease pain.
- Your baby's legs will be held still while the foreskin is removed.
- The procedure lasts 5 to 10 minutes.

After the Procedure

- The penis is wrapped with Vaseline-soaked gauze. The gauze will fall off on its own and may be left off. The stitches under the gauze will dissolve and do not need to be removed. This is called the clamp method.


or

Gudniinka Wiilasha


Gudniinka wiilashu waa maqaarka hore ee ku wareegsan dhamaadka buuryada oo la jaro. Haddii aad go'aan ku gaadhid gudniin, ilmaha dhakhtarkaaga ayaa ku sameyn doona qaybta xanaanada ee cisbitaalka. Haddii ilmahaagu uu yar yahay ama uu leeyahay dhibaatooyin caafimaad, waxa laga yaabaa in loo baahdo in gudniinka la sameeyo wakhti kale. Dhakhtarku waxa uu kaa saxeexi doonaa foom oggalaansho ka hor inta aan la galin hawsha gudniinka.

Buuryo Aan Gudnayn

Buuryo Gudan



Maqaarka Hore



Dhalfada

Inta Lagu Jiro Habka Hawsha

- Dhakhtarku waxa uu buuryada marin doonaa dawo kabuubyo keenaysa ama xanuunka baabi'inaysa.
- Ilmahaaga yar waxa la siin karaa mujuruc sonkor la galiyay si xanuunka looga yareeyo.
- Ilmahaaga lugahaa la qaban doonaa inta laga jarayo maqaarka hore ee buuryada.
- Hawshu waxay socon doontaa 5 ilaa 10 daqiiqadood.

Ka Dib Gudniinka

- ❑ Buuryada waxa lagu duubayaa faashad leh faasliin (Vaseline). Faashadu iyada ayaa iskeed uga go'i doonta ka dibna waa laga dhaafi karaa. Tolmada ka hooseysa faashada way milmi ama baabi'i doonta umana baahna in laga saaro. Waxa tan loogu yeedhaa habka xidhista (clamp method).

ama

- The penis has a plastic ring around it. The ring will fall off in 5 to 7 days. There are no stitches to be removed.
- There may be swelling that will go away in about 4 days.
- Your baby may be fussy, not eat well or sleep more for the first 24 hours.
- As the penis heals, yellowish-white patches may appear. Do not try to wipe these off. The patches will go away as it heals.
- Children's acetaminophen (Tylenol) may be given as ordered by your baby's doctor for pain.

Home Care

- Change diapers often. With each diaper change:
 - ▶ Rinse the area with warm water only, no soap, until the penis heals. Pat dry.
 - ▶ Avoid using diaper wipes. These contain alcohol which will be painful to the unhealed penis.
 - ▶ Look for signs of infection such as redness, swelling or a foul odor.
 - ▶ Apply a small amount of Vaseline or antibiotic ointment around the tip of the penis. Do this until healing is complete.
 - ▶ With the clamp method, it is important to be able to see the entire glans with each diaper change. After 1 to 2 days, if you do not see the glans, gently push the skin back until the entire glans is exposed.

- ❑ Buuryada waxa ku wareegsan fargal caag ah. Fargalkaasi waxa uu ka dhici doonaa 5 ilaa 7 maalmood. Ma jiraan wax tolmo ah oo laga saarayo.
- Waxa dhici karta inuu jiro barar tagi doona qiyaastii ilaa 4 maalmood.
- Waxa laga yaabaa in ilmahaagu uu ooyo, ama aanu si ficcan quud u qaadan ama uu hurdo intii hore ka badan yeesho 24-ka saacadood ee ugu horeeya.
- Marka buuryadu sii bogsato, waxa laga yaabaa in la arko baro midabkoodu yahay hurdi ama jaale cadaan xiga. Ha isku dayin in aad ka masaxdid. Barahaasi waxay iska tagi doonaan marka ay bogsato goobta gudniinku.
- Waxa xanuunka loo siin karaa acetaminophen (Tylenol) ah ka caruurta taasoo ah in loo siiyo sida uu sheego dhakhtarka ilmahaagu.

Daryeelka Guriga

- Beddel xafaayadda ama dhaybarka marrar badan. Markasta oo aad beddelaysid xafaayadda:
 - ▶ Aagga raaci biyo diiran kaliya; ha isticmaalin saabuun, ilaa buuryadu ka bogsanayso. Taataabasho tartiib ah ku qalaji.
 - ▶ Iska ilaali inaad isticmaashid marisyada xafaayadda (diaper wipes). Kuwaas waxa ku jira aalkolo taasoo laga yaabo inay xanuun u keeno buuryada aan wali bogsan.
 - ▶ La soco oo ka eeg calaamadaha caabuqa sida casaan, barar ama ur qadhmuun.
 - ▶ Mari qadar yar oo ah faasliin (Vaseline) ama labeen antibiyootiko ah agagaarka dhamaadka buuryada. Taas samee ilaa bogsashadu ka dhamaanayso.
 - ▶ Marka la adeegsado habka xidhista (clamp method) ee gudniinka, waxa muhiim ah in la arki karo dhamaan dhalfada markasta oo la beddelayo xafaayadda. Ka dib 1 ilaa 2 maalmood, haddii aanad arag dhalfada, si tartiib ah xagga dambe u riix maqaarka ilaa dhamaan dhalfadu ka soo baxayso.

- Your baby can take a tub bath after the penis is healed and the umbilical cord has fallen off.

Call your baby's doctor if you notice:

- More than a few drops of blood on the penis or diaper
- No urine output within 12 hours of the circumcision or very few wet diapers several days after
- Increased redness or swelling, or a foul odor
- Redness moving down the penis toward the abdomen. This may be a sign of infection.
- Pus-like drainage from the penis
- You have trouble exposing the glans
- The plastic ring stays on for more than 10 days

Talk to your baby's doctor if you have any questions or concerns.

- Waxa aad ilmahaaga siin kartaa qubeys ah gudaha saxanka ka dib marka goobta buuryadu bogsato ee ay xuduntu ka go'do.

Wac Dhakhtarka Ilmahaaga haddii aad aragtid:

- Wax ka badan dhawr dhibcood oo dhiig ah oo aad ku aragtay buuryada ama xafaayadda
- Aanay jirin kaadi gudaha 12 saacadood ka dib gudniinka ama ay aad u yar tahay tirada xafaayadaha qoyan ama kaadi leh dhawr maalmood ka dib
- Casaan ama barar soo kordhay, ama ur qadhmuun
- Casaan sare u raacay buuryada oo ku sii socda caloosha. Tani waxay calaamad u noqon kartaa caabuq.
- Dheecaan u eg malax oo ka yimi buuryada
- Waxa dhib kugu ah baneynta dhalfada
- Fargalka caagga ah ayaa ku dhegan mudo ka badan 10 maalmood

La hadal dhakhtarka ilmahaaga haddii aad qabtid su'aalo ama walaac.

2007 – 11/2011 Health Information Translations

Unless otherwise stated, user may print or download information from www.healthinfotranslations.org for personal, non-commercial use only. The medical information found on this website should not be used in place of a consultation with your doctor or other health care provider. You should always seek the advice of your doctor or other qualified health care provider before you start or stop any treatment or with any questions you may have about a medical condition. The Ohio State University Medical Center, Mount Carmel Health System, OhioHealth and Nationwide Children's Hospital are not responsible for injuries or damages you may incur as a result of your stopping medical treatment or your failure to obtain medical treatment.

Male Circumcision. Somali.